

Xukuumadda Soomaaliya

Sharciga 11 Disember 1956, lamba. 17

Dammaanadda Maamulka

MAAMULAHA

Marka uu arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer Dejinta

WUXUU SAARAYAA OO ANSIXINAYAA

Xeerkaa soo socda:

Qod. 1

Lama socodsiin karo, marka laga reebo xaaladaha la qabto isago dambi faraha kula jira, haddii aanu soo oggolaan Wasiirka Koobaad, dambiyada ay galaan iyagoo xilkoda gudanaya:

- Madaxda doorashada siyaasadda- maamulka;
- La-taliyeyaas Degmooyinka Dawladaha Hoose;
- La-taliyeyaasha Degmooyinka;
- Madaxda mushaarka qaata.

Haddii dadka kor lagu soo shegay la qabto iyagoo dambi faraha kula jira, oggolaashaha waxaa la weydiisanyaa isla markiiba iyadoo si ku meelgaara loo si haynayo keliya haddii dambiguu uu yahay mid qabashadiisu tahay waajib.

Qod. 2

Oggolaashahaaso kale waa in la weydiistaa si dacwad loogu qaado saraakiisha iyo xubnaha boliiska, ama askarta ama ka tirsan kuwa qaabka ciidamada u habaysans, ee haya adeegga ammaanka dadwynaha, falalka ay ku galaan shaqada oo la xariira adeegsiga hubka ama qalab kale oo xoog jir ahan loo adeegsado.

Isla sharcigaas waxaa lagu dabbaqayaa dadka, si sharciga waafaqsan la weydiisto oo hawlahaas ka qaybqaatay.

Qod. 3

Waxaa la tirtiray:

- Qod. 23 ee Amarka 30 Maarso 1955, lamba. 5 (Dhismaha iyo dorashada La-taliyeyaasha Degmooyinka);
- Qod. 19. Ee Amarka 2 Febberaayo 1956, lamba. 5 (Xeerka Nidaamka Garsoorka);
- Dhammaan wax allaale wixii ka horjeeda xeerkaan ama aan la jaan qaadi karin.

Qod. 4

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa ururinta rasmiga ee xeerarka iyado lagu baahinayo Faafinta Rasmiga. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato oo u ilaaliso ka xeer Soomaalie ahaan. Tariikhda.

Muqdisho, 11 Disember 1956..

P. Maamulaha

P. Franco

Xukuumadda Soomaaliya

Sharciga 11 Disember 1956, lamba. 17

Dammaanadda Maamulka

MAAMULAHA

Marka uu arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer Dejinta.

WUXUU SAARAYAA OO ANSIXINAYAA

Xeerkaa soo socda:

QODOBKA KELIYA

Qodobada toddoba iyo siddeed ee Xeerka 30 Setember 1956 lr. 10 waxaa loo baddalay sida soo socota:

Qod. 7 — Guddiga Maamulka wuxuu ka koobanyahay siddeed xubnood

.....
— Laga saaray.

.....
— Wasaradda Arrimaha Maaliyadda tre.

.....
— Laga saaray.

.....
Qod. 8 — Laga saaray.

— Iyaga waxay ka koobanyihiin Guddoomiyaha iyo saddex La-taliye oo lagasoo xusho Guddiga Maamulka

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa ururinta rasmiga ee xeerarka iyado lagu baahinayo Faafinta Rasmiga. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato oo u ilaaliso ka xeer Soomaalie ahaan.

Tariikhda, Muqdisho 14 Disember 1956.

P. Maamulaha
P. Franco